

# Hagitaanka Fulinta ee loogu tala galay Sharciga La talinta Isticmaalaha ee Xeerka Cuntada FDA

(Qaybta 3-603.11 ee 1999 FDA Model Food Code)

Qaybta 3-603 ee 1999 Food Code  
Qoraalka Qaabka Buugga FDA  
Hagitaanka Fulinta Sharciga La talinta Isticmaalaha

---

## Hagitaanka Fulinta Sharciga La talinta Isticmaalaha ee Xeerka Cuntada FDA

- Ujeeddada
- Ku haboonaanta
- Qeexitaanka Qodobada
- La talinta Isticmaaluhu in ay tahay Shay Lagama Maarmaan ah
- La talinada Wax soosaarada Gaarka u ah
- U hogaansamidda Qanaacada

Sifooyinka Qaababka ee Bayaanka iyo Xasuusinta  
Bayaan iyo Xasuusin  
Qoraalka Qaabka Buugga FDA  
Hanaanka Aasaasiga u ah Buugga Macmiilka Loogu Tala Galay

- Jaantuska La raacayo ee U hogaansamidda Qanaacada

### Ujeeddada

Ujeeddada sharciga La talinta Macmiilka ee Xeerka Cuntadu waa in lagu xaqiijiyo in dhammaan isticmaaleyaasha lagu wargaliyo khatarta kordhaysa ee khaasatan ku wajahan bulshada nugul taasoo ku saabsan cunista cuntooyinka xayawaanka ee cayriinka ah ama aan sida wanaagsan loo karin. FDA waxay rumaysan tahay in isticmaaleyaasha xog ogaalka ah ay kaalin muhiim ah ka cayaaraan ka ilaalinta naftooda cudurada cuntada ka dhasha kaalintaasuna ay tahay mid aan cid kale aysan u buuxin karin. Isticmaaleyaasha xog ogaalka ah waxay sida ugu wanaagsan u awoodaan in ay qiimeeyaan khatarahooda u gaarka ah ayna qaataan mas'uuliyadda go'aanadooda dalabka, ayada oo lagu salaynayo aqoontooda iyo fahamkooda xaaladda.

Dukumiintigaan hagaha ah waxaa loogu tala galay in looga caawiyo maamulka iyo shirkadda dhaqangalinta sharciga La talinta Isticmaalaha. Waxaa loo isticmaalayaa si barbar socota Xeerka Cuntada FDA.

## **Ku haboonaanta**

La talinta isticmaalaha waxaa loogu tala galay in loo isticmaalo dhammaan goobaha cuntooyinka kuwaas oo lagu iibiyo cuntada xayawaanka ee cayriinka ah ama aan la bislayn ama dadka inay cunaan loogu qaybiyo ayaka oo cayriin ah ama aan bislayn. Arintaan waxaa kamid ah dhammaan noocyada goobaha cuntooyinka markasta oo ay jirto suurtagalnimo macquul ah oo ku saabsan in cuntada la isticmaali doono ayada oo aan la karin mar danbe, oo adag - sida maqaaxiyaha, baararka cayriinka, howlaha adeegyada degdegga ah, qaadashada, iyo goobaha bakhaarada cuntada laga helo kuwaas oo leh howlaha sida dukaanada cuntada karsan ama waaxaha cuntada badda.

## **Qeexitaanka Qodobada**

Qeexitaanada soo socda waxay khuseeyaan fasiraadda iyo isticmaalka sharciga La talinta Istimaalaha. Qodobada la qeexay iyo dhammaan noocyada qodobadaas la qeexay, waxay ku qoranyihiin farta yaryar ee jiifka ah guud ahaan dukumiintigaan.

*Bayaan* micnahiisu waa muujin qoraal ah oo ku saabsan nooca alaabtu tahay, ama la dalban karo, ayada oo cayriin ah ama aan bislayn guud ahaanba, ama alaabta ay kujiraan waxyaabo cayriin ah ama aan bislayn.

*Habraaca Lagama maarmaanka ah* micnihiisu waa faahfaahino ay waajib tahay in la buuxiyo marka la diyaarinayo buugga la talinta isticmaalaha loogu tala galay kaasoo khuseeya isticmaalka cuntooyinka xagawaanka ee cayriinka ah iyo tan aan bislayn.

*Buugga dalabaadka cuntada* micnihiisu waa wax kasta oo isticmaaluhu ka akhrinayo (waraaqda miiska, calaamadda ku dhagan, sabuuradda, ama qaab kale oo qoraal ah) si ay u samaystaan xulashadooda dalabka.

*Dadweynuhu Heli karaan* micnaheedu waa in isticmaaleyaashu u heli karaan si fudud (ayaga oo aan dalban) kahor inta aysan samayn dalabkooda cuntada ama aysan samayn xulashooyinkooda.

*Xasuusin* micnaheedu waa warbixin qoraal ah oo khusaysa khatarta caafimaad ee isticmaalidda cuntada xayawaanka laga helo ee cayriinka ah ama aan bislayn.

*Molluscan Shellfish* micnaheedu waa nooc kasta oo la cuni karo oo ah oysters, clams, mussels, iyo scallops cayriin ah ama aan bislaan ama qaybaha la cuni karo ee kuwaas ah, marka laga reebo marka wax soosaarka scallop ay ka kooban yihiin kaliya muruqa adductor oo qolofa laga saaray. Sidoo kale waxaa loo yaqaanaa *Shellfish* marka la eego warbixinta *xasuusinta*.

*Shellstock* micnaheedu waa xayawaanka badda ku nool ee *molluscan shellfish* oo cayriin ah, oo qolof kujira.

## **La talinta Istimaaluhu in ay tahay Shay Lagama Maarmaan ah**

Marka la eego § 8-405.11 ee Xeerka Cuntada, waxyaabaha lagama maarmaanka ah waa in la saxaa 10 maalmood gudahood marka xadgudubku dhaco. Haddii goob cunto lagu helo ayada oo ku xadgudbaysa sharciga La talinta Istimaalaha, qaababka u hogaansamidda sida kuwa lagu xusay dukumiintigaan iyo badalada kale ee buuxiya ujeedooyinka u hogaansamidda qanaacada ayey si wadajir ah isula soo sahaminayaan goobta cuntada iyo Wakaaladda Maamulku. Marka la helo jawi dadaal is aaminid ah, xaaladaha qaar oo ay kamid tahay wajigaan koowaad ee sameynta la talinta isticmaalaha ee goobaha cuntada tafaariiqleyda ah waxa ay daruuri ka dhigaan awooditaanka wakhti dheeraad ah oo u hogaansamid kahor inta aan talaabo sharci ah la bilaabin.

## La talinada Wax soosaarada Gaarka u ah

La taliyeyaasha isticmaalaha waxaa loo diyaarin karaa in ay noqdaan kuwo waxsoosaar gaar ah loogu tala galay haddii goobta cuntadu ay leedahay *dalab cunto* oo kooban ama ay bixiso kaliya cunto laga keeno xayawaanka oo cayiman taasoo cayriin ah ama aan bislayn, una diyaarsan in la cuno. Tusaale ahaan, baar cuntada cayriinka ah laga cuno oo bixinaya *molluscan shellfish* qolofthii qaar wata, laakiin aan bixinayn cunto kale oo cayriin ah ama aan bislayn, waxay dooran kartaa in ay la talinta isticmaalaha kusoo koobto *molluscan shellfish*. Baarka cuntada cayriinka ah bixiya wuxuu sidoo kale dooran karaa warbixinta xasuusinta 2 ee dukumiintigaan si loo iftiimiyo khatarta faraha badan ee qofka xaaladaha caafimaad ee gaarka ah galayo marka uu laqo *molluscan shellfish* aan dab ku filan lagu karin.

Goobaha cuntada ee kaliya waxyaabaha cuntada ee cayriinka ah, ee u diyaarsan in la cuno ee lagu iibiyo ama lagu bixiyo uu yahay *shellstock* ama *molluscan shellfish qolofthii laga saaray*, buugga qoraalka ah ee kasoo baxa Shirka Fayadhowrka Xayawaanka Badda Ku Nool ee Qolofthii Leh ee Gobolada u Dhexeeya (ISSC) oo loogu tala galay aargoosatada iyo clams ayaa ka kooban u hogaansanka qanaacadda. Xaaladaha noocaas ah, buugga ISSC waa in laga dhigaa "*publicly available*" mid dadweynuhu si fudud u heli karaan.

## U hogaansamidda Qanaacada

### Ujeeddada Guud:

U hogaansanka qanaacadda ee sharciga La talinta Icticmaalaha ee Xeerka Cuntada waxaa la buuxinayaa marka *bayaan* iyo *xasuusin* labadaba loo sameeyo qaab waafaqsan hagahaan. Macluumaadka kujira *bayaanka iyo xasuusinta* labadaba waa kuwo *dadweynuhu si fudud u heli karaan* uuna noqdaa mid la akhrin karo si isticmaaleyaashu ay uga faa'iidaystaan fariinta guud (*bayaanka iyo xasuusinta*) kahor inta aysan samayn xulashada dalabaadkooda.

Dukumiintiga hagitaanku ma qiyaasi karo dhammaan xaaladaha suurtagalka ah. Sidaa darteed, waxaa mar kasta loo baahan doonaa wadaxaajood u dhexeeya goobta cuntada iyo Wakaaladda Maamulka maadaama ay taasi tahay qaabka ugu wixtarka badan ee lagu gaari karo ujeedooyinka u hogaansanka qanaacadda.

### Sifooyinka qaababka ee *bayaanka iyo xasuusinta*:

**Luuqadda:** Luuqadda waxyaabaha ku jira liiska dalabku waa in ay waafaqsanaataa luuqadda loo isticmaalay *bayaanka iyo xasuusinta*. Tiusaale ahaan, dalab cunteed ku qoran Ingiriis waa in *bayaanka iyo xasuusintu* ku qoran yihiin Ingiriis. *Bayaanka iyo xasuusintu* waxay sidoo kale ku qornaan karaan luuqado kale.

**Baaxadda farta:** Baaxadda farta loogu tala galay warbixinada *dalabaadka* gacanta lagu qaato ama waraaqda miiska waa in ay muuqaal ahaan le egkaadaan ugu yaraan 11 dhibcood.

Warbixinada calaamadaha ku qoran, warbixintu waa in ay si le'eg u ahaataa mid loo akhrin karo sida waxyaabaha ku qoran buugga dalabaadka ee calaamadaha dulsaaran. Haddii calaamaddu sidoo kale tahay *dalabka cuntada* ama haddii kaliya loo isticmaalo *xasuusinta*, baaxadda fartu waa in uu ahaadaa mid laga akhrin karo barta isticmaaleyaashu ay inta badan istaagaan si ay u akhriyaan.

Wixii macluumaad ah oo ku saabsan calaamadaha loogu tala galay heerka tafaariiqda, tilmaame wanaagsan waa CFR si waafaqsan Xeerka Seejalidda iyo Calaamadaynta Saxda ah, 21CFR 101.2 kaasoo ku tacaluqa baaxadda farta marka loo barbardhigo baaxadda shaashadda lagu soo bandhigayo. Qodobka kale ayaa sidoo kale saamayn ku yeelan kara si fudud u akhrinta, sida nooca farta iyo gidaarka danbe marka la barbardhigo nooca midabka.

**Bayaanka**

## Ujeeddada:

*Bayaanku* waa in uu:

- saarnaadaa *buugga dalabaadka cuntada* ama, haddii uusan *buuga dalabaadku* jirin, uu asaga oo qoraal ah loo soo bandhigaa isticmaaleyaasha, uuna
- tilmaamo noocyada cuntada u baahan *bayaanka*, uuna
- qeexaa in noocyadaas cuntadu yihiin, ama ka kooban yihiin, cuntooyin cayriin ama aan bislayn oo xayawaan laga keenay.

## Qaababka u hogaansamidda:

1. *Bayaanka* asaga oo ah faahfaahin: Waxyaabaha ayaa la qeexayaa, sida:
  - Aargoosatada qolofa qaar qabta (aargoosato cayriin ah),
  - Salad ay ukun cayriin kujirto, iyo
  - Haambeegarada (waxaa loo karin karaa in la dalbado); ama
2. *Bayaanka* ayada oo xiddig la saarayo noocyada cuntada qaybta hoose kaasoo sheegaya, ayada oo ay ku xiran tahay xaaladda, in waxyaabaha:

*"Lagu bixinayo cayriin ama ayada oo aan bislayn,"* ama

*"Ay ku jiraan (ama kujiri kara) waxyaabo cayriin ah ama aan bislayn";* iyo

3. Marka *buuga dalabka cuntada* la isticmaalo:
  - Wax ka badal *buuga dalabka cuntada* adiga oo isticmaalaya istiikaro aan isbadalayn oo dhejis ah; ama
  - Dib u daabac *buugga dalabka cuntada*; ama
  - Usoo bandhig ogaysiis *bayaan* oo gaar ah oo qoran isticmaaleyaasha si waafaqsan *buugga dalabka cuntada*; ama
4. Marka uu maqan yahay *buugga dalabka cuntadu*:
  - Sii ogaysiis *bayaan* qoran ah isticmaaleyaasha.

## Xusuusinta

## Ujeeddada:

Haddii midkood labada warbixin ee *xusuusinta* ah ee ka kooban macluumaadka la talinta ee saxda ah la isticmaalo, warbixintu waa in macluumaadku waafaqsanaadaa *bayaanka* loona dhigaa si waafaqsan mid kamid ah waxyaabaha soo socda:

- ugu yaraan halmar bog kamid ah *buugga dalabka cuntada* (sida la doorbidayo kan ugu horeeya ama ugu danbeeya) kuna yaalo gudaha *buugga dalabka cuntada* si isticmaaluhu si fudud ugu helo, ama
- calaamadda korkeeda, waraaqda miiska, ama qaab kale oo qoraal ah.

## Qaababka u hogaansamidda:

1. Isticmaal mid kamid ah warbixinada *xasuusinta* ee ka kooban talada dhabta ah:

- Warbixinta *Xasuusinta 1*:

*"Isticmaalka hilibka, digaagga, cuntada badda, xayawaanka badda ku nool ee qolofa leh, ama ukumaha cayriinka ah ama aan si wanaagsan loo karin waxay sare u qaadi kartaa khatarta aad ugu jirto xanuunka cuntada ka dhasha"; ama*

- Warbixinta *Xasuusinta 2*:

*"Isticmaalka hilibka, digaagga, cuntada badda, xayawaanka badda ku nool ee qolofa leh, ama ukumaha cayriinka ah ama aan si wanaagsan loo karin waxay sare u qaadi kartaa khatarta aad ugu jirto xanuunka cuntada ka dhasha, khaasatan haddii aad qabto xaalado caafimaad oo gaar ah."*

2. Isticmaal buugga la talinta isticmaalaha.

### Dookh 1:

Xeerka Cuntada ee soo baxay 1999 wuxuu khiyaar siinayaa waxyaabaha bayaanka laga bixiyay ee hoos looga qoray warbixinta *xasuusinta* kaasoo akhristaha u gudbinaya buugga la talinta isticmaalaha:

*"Ayada oo la tixgalinayo badqabka waxyaabahaan, macluumaad qoraal ah ayaa la heli karaa marka la codsado."*

Marka buugga macluumaadka loo isticmaalo in isticmaaleyaasha lagu xasuusiyo khatartooda buugguna uusan ahayn mid *dadweynuhu si fudud heli karaan*, warbixinta *xasuusinta* ah ee kore ayaa loo baahan yahay in *buugga dalabka cuntada* lagu xuso.

Marka buugga macluumaadka loo isticmaalo in isticmaaleyaasha lagu xasuusiyo khatartooda buugguna uu yahay mid *dadweynuhu si fudud u heli karaan*, warbixinta *xasuusinta* ah ee kore looma baahna in *buugga dalabka cuntada* lagu xuso.

### Dookh 2:

- Isticmaal qoraalka buugga qaabka FDA ee hoose, ama
- Isticmaal buugga macmiilka loogu talagalay kaasoo buuxinaya Hanaanka Aasaasiga ah ee dukumiintigaan kujira.

---

---Kor ku Laabo---

---

---

# Qoraalka Qaabka Buugga FDA

## Hordhac

Waxaad sida ay u badan tahay horeba aad u samaynaysaa taxaddar ka dhan ah cudurka cuntada ka dhasha marka aad guriga joogto, laakiin waxaad u baaahan tahay in aad taxaddarto sidoo kale marka aad guriga ka maqantahay. Waa kuwaan afar talaabo oo fudud oo aad qaadi karto si aad naftaada iyo dadka aad jeceshahay u ilaalinayso marka aad ka dooranayso cuntooyinka u diyaarsan tahay in la cuno maqaaxida, meheradda cuntada diyaarsan gadda, miiska cuntada laga qaato, ama bakhaarka cuntada lagu iibiyo.

## Lambar 1 Ka war hay Cuntooyinka Cayriinka ah ama Aan bislayn

Cuntooyinka xayawaanada ka imaanaya sida hilibka, digaagga, kaluunka, xayawaanka badda ku nool ee qolofa leh, iyo ukumaha marka lagu cuno qaab cayriin ah ama aan si wanaagsan loo karin waxay mararka qaar ka kooban yihiin fayrasyo khatar badan iyo bakteeriya kuwaas oo keeni kara khatar cudurada cuntada ka dhasha ah. Caruurta yaryar, dumarka uurka leh, dadka waaweyn, iyo dadka hanaankooda difaaca jirku liito ayaa si khaas ah ugu nugul. Waxaad kujirtaa khatar dheeraad ah haddii aad qabto cudur beerka ah ama xanuunada khamriga ka dhasha, haddii aysiidka calooshaadu hooseeyo (ayada oo ay sabab u tahay qaliin lagaaga sameeyay caloosha ama isticmaalka waxyaabaha aysiidka looga hortago), ama haddii hanaankaaga difaaca jirku liito ayada oo ay sabab u yihiin: isticmaalka steroid; xaaladaha sida AIDS-ka, kansarka, ama sonkorowga; ama daaweynada sida daaweynta kiimikada ee kansarka.

Si aad u yareeyso fursadaha ay kuugu dhici karaan cudurada cuntada ka dhasha waa in aad ka fogaataa:

- Kaluunka ama xayawaanka badda ku nool ee qolofa leh ee cayriinka ah --aargoosatada, clams, sushi, sashimi, ceviche
- Hilibka ama cuntada badda ee la dalbado ayaga oo aan bislaan sida hanbeegarka, hilibka lo'da, ariga, doofaarka, ama kaluunka "sida dhifta ah u karsan".
- Ukumaha la dalbado ayaga oo aan bislaan iyo cuntada ay kujiraan ukumaha aan bislaan-sida kuwa "dareeraya" ee shiilan ama la kariyey inta qolofa laga saaray ukumaha; koosaarta ama suugada sida hollandaise, mayonnaise guriga lagu sameeyo, iyo koosaarta saladhka Caesar salad; budooyinka sida chocolate mousse, meringue pie, iyo tiramisu.

## Lambar 2 Wax ka weydii diyaarinta

Cunta karintu waa ay kala duwantahay. Haddii aysan kuu kala caddayn in waxyaabaha u diyaarsan in la cuno ay kujiraan waxyaabo aan bislayn, weydii qaabka cuntada loo diyaariyay.

## Lambar 3 Codso in cuntada si adag loo kariyay

Haddii waxyaabaha aad danaynayso in aad doorato ay kujiraan hilib, kaluun, xayawaanka badda ku nool ee qolofa leh oo cayriin ah ama aan bislayn, ama ukumaha, weydii in waxyaabahaas laga saari karo. Haddii cuntada loo diyaariyay in la dalbado, weydii in si adag loo kariyay.

## Lambar 4 Samee xulasho taa ka duwan

Ayada oo cuntooyinka qaar, sida aargoosatada qolofii qaar wadata ama mousse-ka ka samaysan ukunta, waxay noqon kartaa mid aan macquul ahayn in la sameeyo codsigaaga ku saabsan in si adag loo kariyo. Marka xaaladdu sidaa tahay, tartiib waxkale dooro. Waa dhibaato yar marka loo barbardhigo dhibaatooyinka waaweyn ee cudurka cuntada ka dhasha uu keeno.

Si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato cudurka cuntada ka dhasha iyo qaababka looga hortago, la hadal xirfadlahaaga daryeelka caafimaadka ee waaxda caafimaadka deegaankaaga, ama bookho websaytka [www.foodsafety.gov](http://www.foodsafety.gov)

## Jaantuska Buugga Qaabka FDA ee Yaa Khatarta kujira, Cuntooyinka Khatarta ah, iyo Sababta Xanuunka

Ayada oo jaantuska qaabka soo socda lagu daray qaabka buugga FDA, kamid ahaanshaha buugga macmiilka loogu tala galay, gabi ahaanba ama qayb ahaan, waa khiyaari. Qaybo kamid ah jaantuska ayaa loo dooran karaa in la isticmaalo halkii la isticmaali lahaa jaantuska oo dhan, **haddii** kaliya qaybo gaar ah ay khuseeyaan ayada oo lagu salaynayo cuntooyinka la bixiyo. Tusaale ahaan, goobta cuntada bixinaysa kaliya *molluscan shellfish* qolofthii laga qaaday sida aargoosatada qolofthii kujirta, waxaa ay dooran karaa in ay ku darto qaybta jaantuska ee khusaysa *molluscan shellfish* qolofthii laga qaaday oo aanay ka tagto qaybaha kale.

Jaantuska qaabka looguma tala galin in loo isticmaalo si ka madax banaan buugga macluumaadka. Isticmaalka kaliya jaantusku waxay keenaysaa u hogaansami la'aanta shuruudda *xasuusinta*.

### Cudurka Cuntada ka dhasha waa mid laga hortagi karo - haddii aad qaaddo talaabooyinka taxaddarka ah ee saxda ah

CUNTOOYINKA KHATARTA AH (Arintaani waa liis garayn qayb ah)	YAA KHATARTA KUJIRA	SABABHA XANUUNKA
<b>Ukumaha cayriinka ah ama aan la bislayn:</b> Kooxarta Caesar salad; ukumaha aan sida fiican loo karin; buskutka Monte Cristo; meringue pie; qaar kamid ah budooyinka iyo custards; mousse; suugada lagu sameeyay ukumaha cayriinka ah (sida., Hollandaise)	<b>Qof kasta, khaasatan</b> Dadka Waaweyn Caruurta Yaryar Difaaciisa Jirku Liito	Salmonella Enteritidis
<b>Waxsoosaarada caanaha ka samaysan ee cayriinka ah:</b> Caanaha cayriin ama aan la karin; qaar kamid ah burcadka jilicsan sida... Camembert, Brie	<b>Qof kasta, khaasatan</b> Dumarka Uurka leh Dadka Waaweyn Difaaciisa jirku liito Caruurta Yaryar	Listeria monocytogenes E. coli O157:H7 Campylobacter Salmonella
<b>Hilibka cayriinka ah ama aan si wanaagsan loo karin:</b> Haanbeegarka, carpaccio	<b>Qof kasta, khaasatan</b> Dadka Waaweyn Caruurta Yaryar	E. coli O157:H7 Salmonella
<b>Cayriinka ah ama aan la bislayn:</b> <i>Molluscan shellfish</i> ; Clams ama aargoosato cayriin ah ku jirta qolofthii bartkeed	<b>Qof kasta, khaasatan</b> Dadka qaba cudurada beerka ama isticmaalka khamriga Difaaciisa jirku liito	Vibrio vulnificus Vibriosis kale Cagaarshowga A
<b>Kaluunka cayriinka ah:</b> Sushi, ceviche, tuna carpaccio	<b>Qof kasta, khaasatan</b> Difaaciisa jirku liito Dadka Waaweyn	Dharab Ku Nooleyaasha Vibrio parahaemolyticus

<b>Hanaanka Aasaasiga ah ee Buugga Loogu tala galay Macmiilka ee La Xiriira Istimaalaha Cuntooyinka Xayawaanka laga helo ee Cayriin ama aan Bislayn</b>	
<b>Hanaanka Aasaasiga ah</b>	<b>Sida loo Buuxiyo Hanaanka / Waxa loo Baahan yahay in Si gaar ah Wax looga Qabto 1</b>
1. Ku bixi macluumaad saynis ku salaysan, si aad u buuxiso hanaanka; hoos	1. Macluumaadka buuggu waa in uu waafaqsanaadaa macluumaadka sayniska ah ee la xiriira la talinta isticmaalaha ee ka imaanaya bogga websaytka CFSAN ( <a href="http://www.cfsan.fda.gov/~mow/foodborn.html">www.cfsan.fda.gov/~mow/foodborn.html</a> ) & Buugga Qaabka.
2. Qeex khatarta	2. Ku qeex: Noocyada waaweyn, sida, bakteeriyada, fayrasyada, dharab ku nooleyaasha, ama "Jeermisyada", ama Jeermisyada gaarka ah
3. Sharax sababta cuntada xayawaanka laga helo ee cayriinka ah ama; aan la bislayn ay khatar u keenayso	3. Muuji in khatarta la aburo sababtoo ah cuntada xayawaanka laga helayo aan si adag loo karin ama haddii kale aan kulaylka si wanaagsan loo siin si loo xakameeyo bakteeriyada khatarta abadan
4. Sheeg isticmaaleyaasha: khatarta ugu badan ugu jira cudurka	4. Afar (4) qaybood <b>waa in la sheegaa:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Dadka waaweyn</li> <li>• Caruurta yaryar</li> <li>• Dumarka uurka leh</li> <li>• Dadka difaaca jirkoodu liito</li> </ul> <p><b>Ku tali xusidda</b> dadka qaba:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Cudurada beerka (magacow isticmaalaha khamriga)</li> <li>• Aysiidka cuntada oo hoos u dhacda ayada oo ay sabab u tahay isticmaalaha daawooyinka aysiidka ka hortaga ama qaliin lagu sameeyay caloosha dartiis</li> <li>• Hanaanka difaaca jirka oo liita ayada oo ay sabab u yihiin xaaladaha sida AIDS, kansar, daaweynta kiimikada kansarka lagu daaweeyo, sonkorowga, qaadashada steroids-ka</li> </ul>
5. Sii hagd DHAMMAAN isticmaaleyaasha adiga oo si gaar ah u iftiiminaya dadka nugul	Ka warqab dhibaataada. Qof kasta khatar ayuu kujiraa, laakiin dadka qaarkiis ayaa khatar fara badan oo ku saabsan cudurada cuntada ka dhasha kujira karinta xooggan ayaana yaraynaysa khatartaas. <p style="text-align: center;">Khiyaarada Istimaalaha:</p>
Ku dar warbixin adiga oo liis gareynaya cuntada la xiriirta: Cuntada xayawaanka ee loo bixiyo qaab in la cuno u diyaarsan taasoo cayriin ah, aan bislayn, ama si kale aan loo diyaarin si meesha looga saaro jeermisyada.  Tusaale ahaan, cuntooyinka cayriinka ah ama aan bislayn sida hilibka lo'da, ukumaha, kaluunka, hilibka ariga, caanaha, doofaarka, ama <i>molluscan shellfish</i> kuwaas oo loo bixiyo qaabka in la cuno u diyaarsan	(Buugga waxaa la waafajin karaa <i>buugga dalabka cuntada</i> / khiyaarada cuntada) <ul style="list-style-type: none"> <li>• Ka war hay cuntooyinka xayawaanka cayriinka ah ama aan bislayn</li> <li>• Weydii qaabka cuntada loo diyaariyo</li> <li>• Codso in qaybaha cuntada si xooggan loo kariyo; ama haddii qaybaha cuntadu ka kooban tahay waxyaabo cayriin ah ama aan bislayn, codso ayada oo aysan waxyaabahaasu ku jirin</li> <li>• Samee xulasho ka duwan middaan marka cuntadu sida aargoosatada qolofa qabta aan lagaa badali karin marka aad codsato</li> </ul>



<p>6. Hagaaji muuqaalka qaabka, hanaanka, jaantuska</p>	<p><b>Luuqadda bayaanka iyo warbixinada xasuusinta:</b> Luuqadda waxyaabaha ku jira liiska <i>dalabku</i> waa in ay waafaqsanaataa luuqadda loo isticmaalay <i>bayaanka</i> iyo <i>xasuusinta</i>. Tusaale ahaan, <i>dalab cunteed</i> ku qoran Ingiriis waa in <i>bayaanka</i> iyo <i>xasuusintu</i> ku qoran yihiin Ingiriis. <i>Bayaanka</i> iyo <i>xasuusintu</i> waxay sidoo kale ku qornaan karaan luuqado kale.</p> <p><b>Baaxadda farta warbixinta bayaanka iyo xasuusinta:</b> Baaxadda farta loogu tala galay warbixinada <i>dalabaadka</i> gacanta lagu qaato ama waraaqda miiska waa in ay muuqaal ahaan le egkaadaan ugu yaraan 11 dhibcood. Warbixinada ku qoran calaamadaha waa in ay ahaadaan kuwo si le'eg loo akhrin karo sida waxyaabaha ku qoran <i>buugga dalabka cuntada</i> ee ku qoran calaamadda lagana akhrin karo barta isticmaaleyaashu ay inta badan istaagaan waxna ka akhriyaan. Wixii macluumaad ah oo ku saabsan calaamadaha loogu tala galay heerka tafaariiqda, tilmaame wanaagsan waa CFR si waafaqsan Xeerka Seejalidda iyo Calaamadaynta Saxda ah 21CFR 101.2 kaasoo ku tacaluqa baaxadda farta marka loo barbardhigo baaxadda shaashadda lagu soo bandhigayo. Qodobo kale ayaa sidoo kale saamayn ku yeelan kara si fudud u akhrinta, sida nooca farta iyo gidaarka danbe marka la barbardhigo nooca midabka. Jaantusyada: Midabka fartu waa in uu bixiyaa ka duwanaansho cad midabka gidaarka danbe loo isticmaalay.</p>
<p>7. Sheeg qaababka lagu heli karo macluumaad dheeraad ah oo gaar ah (xirfadlaha daryeelka caafimaadka akhristaha waa in lagu xusaa si barbar socota ilaha kale ee maamulka)</p>	<p><b>Warbixinada Lagu Taliyay:</b> "<i>Si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato cudurka cuntada ka dhasha iyo qaababka looga hortago, la hadal xirfadlahaaga daryeelka caafimaadka ee waaxda caafimaadka deegaankaaga, ama bookho <b>websaytka</b> <a href="http://www.foodsafety.gov">www.foodsafety.gov</a></i>"</p>
<p>8. Jaantus qaab oo faahfaahinaya cidda khatarta kujirta, cuntooyinka khatarta ah, iyo waxa sababa xanuunka ayaa kujira buugga qaabka macluumaadka FDA. <i>Kamid ahaanshaha jaantuska qaabka FDA, guud ahaan ama qayb ahaan, waa khiyaari.</i> Jaantuska qaabka looguma tala galin in loo isticmaalo si ka madax banaan buugga macluumaadka. Isticmaalka kaliya jaantusku waxay keenaysaa u hogaansami la'aanta shuruudda <i>xasuusinta</i>.</p>	

## Jaantuska La raacayo ee U hogaansamidda Qanaacada

### XAYAWAANKA BADDA KU NOOL EE QOLOFTA LEH

Goobta cuntadu ma iibisaa *shellstock* ama ma bixisaa *molluscan shellfish* cayriin ah kuwaanina ma yihiin cuntada xayawaanka laga helo ee kaliya ee cayriinka ah ama aan bislayn ee la iibinayo ama la bixinayo?

N  
↓  
Y

Ma yahay buugga qoraalka ah ee Shirka Fayadhowrka Xayawaanka Badda Ku Nool ee Qolofa Leh (ISSC) mid *dadweynuhu si fudud u heli* karo?



N →

Goobta cuntadu ma bixisaa cunto loo bixiyo qaab u diyaarsan in markaas la cuno taasoo cayriin ah, aan bislayn, ama si kale aan loo diyaarin si meesha looga saaro jeermisyada (sida hilibka lo'da (eeg halmid oo laga reebay Xeerka Cuntada ee soo baxay 1999, § 3-201.11(E)), ukumaha. kaluunka. hilibka ariga. caanaha. hilibka doofaarka, digaagga, iyo/ama cuntada badda?)

N →

**LA TALINTA  
ISTICMAALUHU MA  
KHUSAYSO**

Y ↓

N →

*Buugga dalabka cuntadu ma bayaamiyaa* nooca cuntada ah ama lagu dalban karo ayada oo cayriin ah ama aan bislayn guud ahaanba, ama alaabta ay kujiraan waxyaabo cayriin ah ama aan bislayn?

N →

**KA BAXSAN U  
HOGAANSAMIDDA**

Y ↓

*Buugga dalabka cuntadu wax ma ku bayaaminayaa:*  
-- faahfaahin ahaan, ama  
-- xiddig saarid(\*) iyo qoraal hoose?  
AMA, haddii uusan jirin buugga dalabka cuntadu, ma la keenay *bayaan* qoraal ah?

N →

**KA BAXSAN U  
HOGAANSAMIDDA**

Y ↓

Goobta cuntadu isticmaaleyaasha ma *xasuusisaa* khataraha caafimaadka?

N →

**KA BAXSAN U  
HOGAANSAMIDDA**

Y ↓

Goobta cuntadu *xasuusinta* ma u bixisaa qaab ah;  
-- warbixinta *xasuusinta*, ama  
-- buug qaabka FDA ah, ama  
-- buug macmiilka loogu tala galay, ama  
-- warbixin ku calaamadaysan RTE aan bislayn, cunto horey loo kala qaybiyay sida tan ka imaanaysa miiska deli, ama  
-- qaababka kale ee qoraalka ah, marka loo eego hagitaanka u hogaansamidda

N →

**KA BAXSAN U  
HOGAANSAMIDDA**

Y ↓

Xasuusintu ma tahay mid *dadweynuhu si fudud u heli* karo una akhrrin karo?

N →

**KA BAXSAN U  
HOGAANSAMIDDA**

Y ↓

**U HOGAANSAMIDDA QANAACADA LA GAARAY**